

Ilaali Biyaha, Ilaali Wabiyadaada

Koonfurta bari ee ingiriisku waxay heshaa kala badh roobka ay helaan UK oo dhama. Isbadalka cimilada waxaa jira cadaadis balaadhan oo saaran kheyraadka biyaheena. waxaynu u baahanahay in si wada jir ah loo wada shaqeeyo si loo xaqiijiyo helitaanka biyo qofkasta hadda iyo mustaqbalkaba.

Celcelis ahaan qof kasta waxa uu isticmaala 150 litir maalinti. tani waxay u dhigantaa 15 baaldi ama laba saxan qubaysi (bath) oo buuxa. Guriga waxaynu isticmaalna:



32% Qubaysi iyo Saxan qubaysi
20% Biyu raacinta Suuliga ama Musqusha
12% Karin iyo Cabitaan
10% Dhaqitaanka gacmaha
9% Dhaqida Weelasha
8% Dhaqida maryaha
6% Waraabin
3% Isticmaalka Kale ee Guriga

Ilaalinta biyuhu waa mid fudud oo caawinaysa ilaalinta wabiyadeena maxaliga ah

Ilaali biyaha Waraabka beerta



Ma ogtahay celcelis ahaan in 85,000 litir oo biyaha roobka ahi ku dhacaan saqafyada guryaheena sanad kasta? Isticmaal majaroor/biyo qabte si aad u kaydiso biyaha roobka oo aad ugu isticmaasho waraabinta dhirta ama aad ugu dhaqdo baabuurka.



Caaga beerta lagu wareebiyo wuxuu isticmaala 1000 litir saacadii.

Isticmaal koonbada waraabka adigoo toos u waraabinaya, ama isticmaal tuunbo adigaa afka bac kaga xidhaya. waraabi subaxa ama fiidka.



Wax badan ka ogow:

Si aad ugaga qayb qaadato si bilaash ah, bandhigyo lagu ilaalinayo biyaha oo maad leh ka hubi, bandhigyada soo socda ee Colne Valley Regional Park :

www.colnevalleypark.org.uk

Shirkadaada maxaliga ah ee biyaha, affinity water, waxay bixinaysaa qalabyo lagu ilaalinayo biyaha oo bilaash ah.

www.affinitywater.co.uk/savewater



Ilaali wabig- aaga



Colne Valley Regional Park

Biyuhu waa il muhiim ah taas oo bani aadamka iyo duur-joogtuba u baahan yihiin si ay u nolaadaan

Colne Valley Regional Park waxay leedahay gacan ka badan 200km iyo harooyin 60 ka badan. Ayna sabab u tahay gooddiga isbadalka cimiladu.

Biyaha aynu ku isticmaalno guriga waxay ka yimaadaan ilo dhulka hoostiisa ah laguna magcaabo lakabyada hoose ee biyaha kaydiya. Kuwani waxay ina siiyaan biyaha wabiyada, biyaha baliyada iyo kuwa aynu guryaha ku isticmaalno. Biyo badan oo aynu ku isticmaalno guriga waxay ka dhigan tahay biyaha oo ka yaraanaya wabiyada iyo duur-joogta.

Ilaalinta biyuhu waa mid fudud, isbadal yar oo la sameeyo ayaa samayn kara farqi weyn

- Ilaali biyaha
- Ilaali lacagta
- Ilaali wabiyadaa-da iyo duur-joogta



Ilaali biyaha guriga

In kabadan kala badh biyaha aynu ku isticmaalno guriga waxa loo isticmaalaa musqusha, sida awgeed halka ugu weyn ee aad ilaalinta ka bilaabaysaa waa halka.



Xidh qasabada inta aad ilkaha cadayanayso. Tani waxay kaydinaysaa in ka badan 6,500 litir sanadkii.



Kusoo gaabi qubaysigaaga 4 daqiiqadood.



Hadii musqushaadu ay leedahay laba badhan oo biyo raacin ah u isticmaal badhanka yar dareerayaasha.

Ku wareeji biyo raaciyaha musqushaada mid biyaha madhxiya adiga oo ku rakibaya 'Save-a-Flush'. Tani waxay kaydinaysaa 1.2 litir halkii biyo raacinba.




Kaliya dhaq maryaha hadii ay wasakh leeyihiin – tani waxay caawinaysaa joojinta microfibers-ka galiya wabiyada, waxayna ka dhigaysaa maryahaaga kuwa in badan waara.

Isticmaal makiinada dhaqida kaliya marka ay buuxdo.



Celceliska saxanka qubeyska (bath) ahi waxa uu isticmaala 80 litir oo biyo ah, waa in ka badan kala badh isticmaalka biyaha maalinlaha ah.

Sida awgeed ku qubayso biyo yar saxanka dhexdiisa ama isticmaal qubeysi gaaban.



Hagaaji liigida biyaha Musqusha – Musqusha liigaysaa waxay khasaarin kartaa 400 litir maalin kasta.

